

Warqadda Xaqiiqada Sharciga Dallacaadda Dadweynaha

Warqadaan xaqiiqada waa ilo la siiyo dadka qaba su'aalaha ku saabsan sharciga dallacaadda dadweynaha ee cusub. Waaxda Shaqada iyo Adeegyada Qoyska ee Dagmada Franklin (Franklin County Department of Job and Family Services) waxay mas'uul ka tahay fullinta ama tarjamada siyaasaddaan iyo waxay dadka aaminsan in ay saamayn doonto ku dhiirigelisaa in ay hoggaamin dheeraad ah ka raadsadaan qareenada socdaalka ama aqoonyaano kale.

Kor Ka Eegidda:

Bishii Janaayo 27, 2020, Maxkamadda Sare Mareykanka (U.S. Supreme Court) waxay ogolaatay isbaddalada la soo jeediyay in lagu sameeyo dallacaadda dadweynaha (dallacaadda dadweynaha), balaarinta ujeedada brograamyada iyo qodobada laga yaabo in madaxda muhaajiriinta federaalka tixgeliyaan marka ay rabaan in ay ogaadaan haddii loo baahan yahay in la bixiyo xaaladda dagganaashada joogtada [taasoo ah "kaarka cagaaran" ("green card")]

Su'aal: Maxaa Ioola jeedaa Dallacaadda Dadweynaha (Public Charge)?

"Dallacaadda Dadweynaha" waa eray ay isticmaalaan madaxda si loo ogaado haddii arjiilaha soo dalbaday dagganaasho joogtada ah u badan yahay in uu ku tiirsado kaalmada dawladda federaalka, macnaha qaadashada manaafacaadka federaalka in ka badan bar ka bar dakhliga soo galo isaga ama iyada. Waxaa dhici karto in arjiileyaasha loo arko in ay ka fa'iideystaan dallacaadda dadweynaha loo diido dagganaashada joogtada.

Su'aal: Maxaa is baddalay?

Sharciga dallacaadda dadweynaha ee cusub wuxuu fidiyaa brograamyada ay dawladda federaalka tixgelin doonto xagga go'aanada laga gaaro dallacaadda dadweynaha, laguna darro caafimaadka, nafaqada, iyo brograamyada guryaha, kuwaasoo mar hore laga saaray.

Sharciga wuxuu "dallacaadda dadweynaha" ku sifeyaa arjiilaha qaata hal ama ka badan manaafacaadka dadweynaha in ka badan 12 bil marka leysu geeyo muddo 36 bil gudahooda (tusaale ahaan, qaadashada Brograamka Kaalmada Kabidda Nafaqada) (SNAP, Supplemental Nutrition Assistance Program) iyo manaafacaadka Medicaid labadaba muddo hal bil gudaheeda, waxaa loo xisaabi doonaa labo bil).

Iminka waxaa manaafacaadka dadweynaha lagu sifeyaa oo lagu daray brograamyada manaafacaadka lacagta caddaanka ee laga qaato federaalka, gobolka ama deegaanka xagga sugidda dakhliga iyo qaar ka mid ah brograamyada caafimaadka, nafaqada, iyo guryaha ee horay laga saaray xagga go'aanada laga gaaro dallacaadda dadweynaha, sida Medicaidka aan degdegga ahayn ee la siiyo qaangarta aan xaamilada ahayn, SNAP ama boonada raashinka, iyo dhowr ka mid ah brograamyada guryaha (sida guryaha Section 8 ama kaalmada kirada, iyo guryaha dadweynaha ee hoos yimaada Section 9).

Brograamyada Federaalka ee Hoos Yimaada Ujeedada Dallacaadda Dadweynaha

Brograamyadii la soo Dhaafay	Brograamyada Cusub ee lagu soo Daray
<ul style="list-style-type: none"> Dakhliga Sugidda Dheeraadka (SSI, Supplemental Security Income) Kaalmada Ku Meelgaarka ee la Siiyo Qoysaska Baahan (TANF, Temporary Assistance for Needy Families). Daryeelka muddada-dheer 	<ul style="list-style-type: none"> SNAP Medicaidka Aan-Degdegga Ahayn Medicare Qeybta D (Part D) Kabidda Dakhliga-Hoose Guryaha Dadweynaha: Qeybta 8 (Section 8) Kaalmada Kirada

Su'aal: Ma jiraan brograamyada AAN ku jirin dallacaadda dadweynaha?

Haa. Waxaa jira brograamyada badan aan lagu darrin dallacaadda dadweynaha sida Brograamka Ceymiska Caafimaadka Caruurta (CHIP, Children's Health Insurance Program), brograamyada nafaqada sida miisaska raashinka (food banks), qadada dugsiga iyo Brograamka Nafaqada Kabidda Khaaska (Special Supplemental Nutrition Program) ee la siiyo Dumarka, Dhallaanka, iyo Caruurta (WIC, Women, Infants, and Children), iyo sidoo kale adeegyada xanaanada cunugga, manaafacaadka guriga iyo manaafacaadka kale ee aan ahayn lacagta caddaanka lagana qaato gobolka iyo dawladda hoose.

Su'aal: Yuu saamayn doonaa isbaddalkaan?

Arjiileyaasha soo dalbada dhallashada Mareykanka (bedelkii xaaladda dagganaashada joogtada) ma saamayn doonto, waxayna qaadan karaan dhallashada xattaa haddii ay qaataan manaafacaadka dadweynaha. Waxyaabaha reeban waxaa kaloo loo fidiyay qaar ka mid dadyowga soo haajiray, sida qaxootiga.

Dadka la filaayo in ay inta badan saameeyso waxaa ka mid ah dadka u sugan dibadda Mareykanka ee raadiya in ay soo haajiraan. Waxaa dhici karto in muhaajiriinta u baahan adeegyo (tusaale SNAP ama Medicaid) aan lagu dhiirgelinin in ay soo dalbadaan taasoo ugu wacan cabsi laga qabo in la dhoofiyo.

Dadyowga uu Saameeyo Baddalaadda Sharciga	
Dadyowga uu Saameeyo	Dadyowga Uusan Saamaynin
<ul style="list-style-type: none"> Dadka horay si sharciyeysan u soo haajiray Mareykanka ee: <ul style="list-style-type: none"> Soo Dalbada in ay noqdaan dagganeyaal joogto ah oo sharciyeysan ama haysta kaarka cagaaran; Soo dalbada in ay dheereyaan ama baddalaan fiisada qofka aan soo haajirin ama raba in ay dib u cusboneysiyaan xaaladooda. Dadka raadiya in ay yimaadaan Mareykanka ee: <ul style="list-style-type: none"> Soo dalbada fiiso Dadka haysta kaarka cagaaran (green card) ee dibadda ka ah Mareykanka in ka badan 180 maalin. 	<ul style="list-style-type: none"> Muwaadiniinta Mareykanka; Dadka aan warqadaha haysanin (maxaa yeelay inta badan xaq uma laha kaalmada dadweynaha); <ul style="list-style-type: none"> Waxaa dhici karto in ay saameeyso muhaajiriinta soo dalbada in la baddalo xaaladooda socdaalka Qaxootiga iyo laajiga; Dadka ka fakada dagaalka guriga, xambaarka, iyo dambiyada kale ee culus.

XASUUSIN: Dadka waa in ay la socdaan in isbaddalka sharciga uusan ahayn siyaasad-ku-dhisan-dhamaan-hal-cabbir (one-size-fits-all policy). FCDJFS waxay ku tallineysaa in lala tashto qareenka socdaalka ka hor inta qofka uusan gaarin dalbanin ama ka noqonin brograam lagu qaato manaafacaad

Su'aal: Maxay tahay saameynta ay ku leedahay macaamiisha Waaxda Adeegyada Qoyska iyo Shaqada ee Dagmada Franklin (FCDJFS, Franklin County Department of Job and Family Services)?

Boqolkiiba tiro yar oo ka tirsan macaamiisha FCDJFS ayaa la filaa in uu saameeyo isbaddalka sharcigaan. Tusaale ahaan, boqolkiiba 0.1% kuwa qaata FCDJFS SNAP ayay xaaladooda socdaalka saamayn doontaa.

Inta badan macaamiisha FCDJFS (98.4%) waa muwaadiniin ama waxay si joogto ah ku daggan yahiin sharci mana saamayn doonto dadkaan. Sidoo kale ma saamayn doonto qaxootiga (1.2%) iyo Laajiyiinta (0.1%).

Qaatayaasha SNAP ee Dagmada Franklin (01/28/2020)		
Xaaladda Socdaalka	#	%
Muwaadiniinta Mareykanka	146,451	95.3%
Kuwa Qaatay Dhallashada Mareykanka Muwaadiniinta	28	0.02%
Dagganaha Joogtada Sharciyeysan (Legal Permanent Resident) (Kaarka Cagaaran)	4,809	3.1%
Laajiga	178	0.1%
Qaxootiga	1,866	1.2%
Muhaajirka Kale	140	0.1%
Wadarta SNAP	153,606	100%

**Ilaha: Ohio BI, Warbixinta Tafatiran ee Tirada Dadka (Individual Demographics Detail Report) (01/28/2020)*

Su'aal: Sidee ayay FCDJFS u isticmaashaa macluumaadka gaarka ah ee laga soo gudbiyo macaamiisha?

Dawladda federaalka ma gasho siistemyada FCDJFS ee loogu talagalay talaabada hirgelinta socdaalka. FCDJFS waxay adeegsataa oo keliya macluumaadka ay soo gudbiyaan macaamiisha si ay u ogaato haddii ay xaq u leeyahiin brograamyada kaalmada. Waxaa dhici karto in FCDJFS u baahato in ay xaqiijiso macluumaadka loo gudbiyo dawladda federaalka hase ahaatee taasi waxaa loogu taloglay oo keliya in lagu xaqiijiyay xaq u yeelashada brograamyada iyo adeegyada.

Su'aal: Maxaa dhaca haddii aan qaadanin manaafacaad balse caruurteyda qaataan? Taasi ma saamayn doontaa arjigeyga kaarka cagaaran?

Maya. Sharciga dallacaadda dadweynaha ee cusub wuxuu leeyahay in dawladda federaalka tixgelin doonto oo keliya manaafacaadka dadweynaha uu isticmaalo qofka raadsada in uu baddalo xaaladiisa ama xaaladeeda socdaalka, balse ma aha manaafacaadka dadweynaha uu isticmaalo xubin ka tirsan qoyska.

Su'aal: Goorma ayuu isbaddalkaan hirgeli doonaa?

Adeegyada Waddaniyadda iyo Socdaalka Mareykanka (USCIS, United States Citizenship and Immigration Services) waxay baddalaaddaan ku fullin doonaan arjiyada ay boostada shabbadeysay marka ay ahayd Febraayo 24, 2020 ama kaddib. Arjiyada ama codsiyada lagu dalbado dheereynta joogitaanka ama baddalaadda xaaladda, Waaxda Sekuritiga Waddanka (Department of Homeland Security) waxay tixgelin doontaa oo keliya manaafacaadka dadweynaha la qaatay marka ay ahayd Febraayo 24, 2020 ama kaddib. Macluumaad badan waxaa laga heli karaa <https://www.uscis.gov/legal-resources/final-rule-public-charge-ground-inadmissibility>.

Su'aal: Maxay yahiin ilaha kale ay heli karaan kuwa uu saameeyo isbaddalkaan?

Immigrant Legal Resource Center (ilrc.org/public-charge)

Kaiser Family Foundation) (www.KFF.org)

- [Public Charge Key Takeaways Fact Sheet](#)

National Immigration Law Center (www.NILC.org)

- [Public Charge: Does This Apply To Me?](#)
- [Know Your Rights: Public Charge Messages for Community Members](#)